

Maktabadaha Deegaanka Hennepin waxaa laga heli karaa kumbiyuutaro dad weynaha ay isticmaali karaan

Saldhiga **Isku xiriyaasha yar yar** (khadka la isu geeyey ee CD-ROMyada waxbarashada iyo madaddaalada caruurta)-qaar ka mid ah waa Spanish.

Isku xiriyaasha caruurta waxaa loogu tala galey wacluumaadka ay u baahan caruurta iyo qoysaska. Waxaana ka mid ah isku xiriyaasha caruurta ee Harbor (boosas Internet ah oo horey loo doortey dibna loo hubiyey; matooro baaritaan oo loogu tala galey baahida caruurta; caawinta shaqada guriga (khadka Interka ee buugga laamaha cilmiga ee loo yaqaan Britannica, majaladaha iyo kuwo kale oo fara badan); si toos u isticmaalida daliil-hayaha Maktabada Deegaan Hennepin; barnaamijka kumbiyuutarka ee Word Processing; iyo barnaamijyada maktabada oo loogu tala galey caruurta.

Isku xiriyaasha caruurta da'doodu u dhaxeeyso 13-19sano wuxuu u diyaariyaa caruurta waaweyn qalabka ay ugu baahan yihiin baaritaanka iyo waxyaabaha ay u baahan Madaddaalo ahaan. Waxaana ka mid ah "mowduucyada kulul ee shaqada guriga", barnaamijka kumbiyuutarka ee Word Processing (oo loo isticmaalo qoritaan iyo sameynta dukumiintiyada), isticmaalka Internetka, daliil-hayaha Maktabada Deegaanka Hennepin iyo isku xiraha bogaga (boosaska) iskuulada Minnesota badankooda.

Isku xiriyaasha ilaha macluumaadka wuxuu ahmiyad gooni ah siinayaa dadka doonaya in ay baaraan mowduucyada taxan oo ballaaran ayna ka midka yihiin qalabka tixraaca sida buuggaagta laamaha cilmiga ay ku urusan yihiin, majaladaha, joomaalada, buugga tusiyaha telefoonada iyo ilaha macluumaadka la rukunto sida College Search. Dadweynaha waxay ka heli karaan Maktabada Deegaanka Hennepin in ka badan 65 macluumaadka kumbiyuutarka ah oo la rukuman karo lacagna aan ahayn. Isku xirka ilaha macluumaadka waxaa kaloo ka mid ah web site-yo si gaar ahaaneed loo soo doortey, loona habeeyey mowduucyo iyo tixraac-celin la xiriirta baarista iyo qalabka tixraaca, iyo waliba daliil-hayaha Maktabada Deegaanka Hennepin.

Isku xiriyaasha Internetka wuxuu bixiyaa adeeg buuxa oo isticmaalka Internetka ah, ayna ka midka yihiin e-mailka, oo lagu darey qalab tixraac oo la isu geeyey, web site-yo si gaar ahaaneed loo soo xuley iyo daliil-hayaha Maktabada Deegaanka Hennepin.